# Dhalinyarada Guriga Dibada Uga Nool

Youth Living Away from Home

## Waalidkay ma igu khasbi karaan inaad soo noqdo?



Badanaa, guriga dibada ugama noolaan kartid aan ahayn inaad:

- Ka haysato ogolaansho waalidkaa ama mas'uulkaaga
- 18 sanno jirto ama aad ka weyn tahay
- Aad guursatay
- Aad ka tirsan tahay ciidamada qalabka sida ama
- Aad haysato amar maxkamaeed oo oranaya gooni waad noolaan kartaa

Hadii waalidkaa ay ogolaadaan inaad gooni u noolaato, waa ay isbedeli karaan – aan ka ahayn inaad haysato amar maxkamadeed oo oranaya waa aad ku noolaan kartaa meel iyaga ka dheer. Hadii aadan ku noqon, waxa ay ka bilaabi karaan kiis baxsi ah maxkamad si ay kuu soo celiyaan.

**LAAKIIN**

**Hadii aad ka baqayso in wax lagugu yeelo ama lagugu dayaco guriga, taa u sheeg bilayska ama hawlwadeenka hay'ada ilaalinta ilmaha ee degmadda. Waxaa aad codsan kartaa amar maxkamadeed si uu kuugu ogolaado inaad la noolaato qof kale ama aad kaligaa u noolaato. Waxaad kalood ka wici kartaa Barnaamijka Sharciga Dhalinyarada (Youth Law Project) khadka ah (612) 332-1441 ama waxaad emayl ugu dir ciwaanka ah youthlawproject@mylegalaid.org.**


## Xaaladahee sharcigan ii ogolaan kara ku noolaanshaha meel guriga dibada ka ah?

Waxaa jira xaalado sharci oo kala duwan oo bedeli kara xiriirka u dhaxeeya adiga iyo waalidkaa.

- **Codsiga (CHIPS)** (Ilmo u baahan Ilaalin iyo Adeeg). Maxkamada kuraydu waxa ay amri kartaa adigu inaad la noolaato dad kale. Maxkamadu waxa ay go'aansataa kormeerka aad u baahan tahay. Dacwooyinka (CHIPS) ah intooda badan waxaa soo xareeysta degmada, ka dib kolka hay'ada ilaalinta ilmahu ay soo baarto dacwada.

- **Wareejinta Awooda Waalidka (DOPA)**. DOPA waa warqad uu waalidkaa saxiixo si uu ugu ogolaado qof kale inuu kuu noqdo waalid oo kale. Waxayna socon kartaa taasi ilaa iyo 12 bilood, waalidkaana markii ay rabaan ayey ka noqon karaan taa. Eeg Warqadayada Xogta Aruursan ee *Wareeginta Mas'uuliyada Waalidka (DOPA)*.


**Foomamka DOPA:** ka samee foom buuxsan khadka (online) ka ah www.lawhelpmn.org/forms. *(ingiriisi kaliya)*



→Qaybta "Family Law" *(Xeerka Qoyska)*
→Riix "Delegation of Parental Authority (DOPA)" (*Wareejinta Awooda Waalidka)*

- **Amarka Amaan helida (OFP).** Hadii waalidkaa ay kuguugu taciyeen qabli ahaan, jir ahaan, ama fara-xumeyn ahaan ama la xiriirida iyagu ay adiga wax ku yeelayso, maxkamadu waxa ay amri karaa inay kaa dheeraadaan iyaga ama ay kugu arkaan uun kaliya shuruudaha ku cayiman amarka anmaan bixinta (OFP). Amarka (OFP) waxaa kale oo uu wax ka qabtaa hanjabaadaha tacadiga jirka. Eeg Warqadayada Xogta Aruursan ee *Amarka Amaan Helida iyo Amarka Khashkhashaada*.


**Foomka OFP :** ka samee foom buuxsan diyaar u ah xareyn www.lawhelpmn.org/forms.



→ Qaybta "Abuse and Harassment" *(Tacadiyada iyo Khashkhashaadaha)*
→ Riix "Order for Protection Against Domestic Violence (OFP)" *(Amarka amaan helida ee qoyska isqabta)*

- **Xoroobid.** Gobolada qaakood waxa ay leeyihiin wax la yiraa "xoroobid" oo ay maxkamadu amarto in qofka dhalinyarada ahi uusan waalidku mas'uul ka ahayn mar dambe ayna kaligood yihiin wixii markaa ka dambeeya. Ma jiraan wax nidaam cayiman ah oo ku saabsan "xoroobida" oo ka jira Minnesota, laakiin, xoroobidu waa ay ka dhici kartaa halan. Eeg Warqadayda Xogta Aruursan ee, *Xoroobid* ka dibna, ka wac Barnaamijka Sharciyada Dhalinyarada (Youth Law Project) (612) 332-1441 si aad wax badan uga ogaato arrinta.

## Guri anigu kaligay ma kiraysan karaa?




Haa. Ma jiraan wax sharci ah oo u diidaya dadka dhalinyarada ah ee da'doodu ka yar tahay 18 ka sanno kiraysiga guryaha ama qof degan guri ka sii kiraysiga ama qof kiraysiga. Laakiin qaar ka mid ah mulkiilayaashu guri kaama kireynayaan hadii aad ka yar tahay 18 sanno. Ma jiraan wax sharci ah oo iyaga u sheegaya inay khasab tahay inay guri kaa kireeyaan. Qaar qolayaha guryaha ahi waa ay ka kireeyaan kurayda guryaha hadii qof weyni uu sidoo kale saxiixo heshiiska liiska guriga degida, isagoo qofkaasi balanqaadaya inuu kirada isagu bixin hadii aadan adigu bixin.

## Ma la noolaan karaa dadka kale oo waawewyn oo aan ka ahayn waalidkay?

Laakiin. Xasuusnow, hadii aad guriga dibada uga nooshahay adigoo aan waalidkaa kuu ogolaan ama aadan haysan amar maxkamadeed, waxaa dhici karta in laguu tixgeliyo baxsi. Qofkii weyn ee adiga kula nool kolkaa waxaa dhici karta inuu dhib dhanka sharciga ula kulmo "qarin" qof baxsi ah. Qarinta macnaheedu waa haynta ama caawinta. Xirid cid loo soo xiro "qarin" baxsade badanaa ma dhacdo, aan ka ahayn in wax kale oo dambi ah iyana la gaystay. Hadii adiga iyo qofka weyni aad isku raacdaan inaad halkaa mudoo dheer ku noolaato, kala soo xiriir, Barnaamijka Sharciyada Dhalinyarada (Youth Law Project) khadka (612) 332-1441 si aad ugala hadasho waxa aad sameyn karto.

## Xaggee ayaan iskuul ka dhigan karaa?

Waxa aad xaq u leedahay inaad iskuul ka dhigato gudoonka aad ku nooshahay. Marmarka qaarkood, iskuulku waa uu ku diidi karaa. Waxaa dhici karta inaad iskuulka ka dhigato meesha waalidkaa ku nool yahay, ama aad u baahato in waalidkaa ku qoro iskuulka. Tani waxaa laga yaabaa inaysan xaq ahayn. Wac gudoonka waxbarashada qofka u qaabilsan xiriirinta dhalinyarada hoy la'aanta ah hadii iskuulku uu ku diido. Ama Wac Barnaamijka Sharciyada Dhalinyarada (Youth Law Project) ee Xafiiska Gargaarka Sharciyada (Legal Aid) si aad talo uga hesho (612) 332-1441.



## Ma khasabaa inaan iskuul dhigto?

Waa khasab inaad iskuul dhigato hadii aad jirto 17 ama aad ka yar tahay. Hadii aad iskuulka u gooyso, waxaa lagaaga dacaweyn karaa maxkamada kurayda dambi iskuul u googaynta ah. Iskuulkaaguna waxaa dhici karta inuu kaa saaro iskuulka hadii aad u googayso iskuulka muddo ka badan 15 maalmood sannad gudihii.

- Haddii aad jirto 17 aadna doonayso inaad iskuulka ka tagto, waa khasab inaad la kulanto waalidkaa iyo madaxda iskuulka. Adiga iyo waalidkaa waa inaad saxiixdaan oraah qoran.
- Hadii aad qaadato waxa la yiraa (MFIP), waa khasab inaad iskuul dhigato ilaa inta aad ka qalin jabinayso, aad ka qaadanayso shahaadada GED ama ka gaarayso 18 sanno.

- Hadii da'daadu u dhaxeyso 18 ilaa iyo 20 aadna qaadato (MFIP), waxa aad go'aansan kartaa inaad iskuulka sii dhigato ama aad shaqo aado. Waa khasab inaad labada mid aad doorato, hadii kale waxaad dhumin kartaa manfacaaga (MFIP) ka. Eeg warqadayda xogta aruursan ee *Barnaamija MFIP ee Waalidiinta da'doodu ka yartahay 18 sano*.

## Ma u baahnahay ogolaanshaha waalidkay si aan u helo daryeel caafimaad?

- Hadii uusan daryeelku ahayn mid la xiriira uur, ilmo dhalid, daryeelka ilmahaaga, ama (STD) (Cudurada Galmada la isku qaadsiiyo), dabiibid khamri ama maandooriye (sharci gaar ah ayaa quseeya ilmo iska soo ridida.)

- Maya hadii aad gaar u nooshahay aadna adigu is-dabarto. Tirada kuma jirto sida aad isu dabartaa adigu; waxa ay noqon kartaa shaqo, (GA) ama (MFIP)

- Maya hadii aysan wax degdeg ah ahayn, aysana helida ogolaanshaha waalidku dib u dhigayn daryeelkaaga.

- Maya hadii aad guursatay ama aad ilmo leedahay.

- Eeg warqadayada xogta aruursan ee *Dhaqtar aan aniqu leeyahay ma yeelan karaa hadii aan ka yarahay 18 sanno?*

## Ma khasabaa inaan bixiyo kharashka daryeelada Caafimaad?

Haa. Laakiin hadii aad xaq u leedahay Gargaarka Guud [General Assistance (GA)] ama Barnaamijka Maalgelinta Qoysaska Minnesota [Minnesota Family Investment Program (MFIP)], waxa aad heli Gargaar Caafimaad [Medical Assistance (MA)]. Hadii aadan heli karin (MA), raadso rug caafimaad oo siisa kurayada daryeelo lacag la'aan ama qiimo jaban ah. Waxaa dhici karta iyana inaad heli karto Kaarka la yiraa (MinnesotaCare).



Ka wac 2-1-1 gobolka oo dhan si aad u ogaato rugaha caafimaad meelaha ay ku yaalin. Waxaad kaloo dhambaal (text) qoran ugu diri kartaa ziib koodkaaga lambarka 898-211 si aad uga hesho caawimaad deegaankaaga ama ugula hadasho khadka ah www.211unitedway.org/about-211/somali.

**Mar walba waco 911 hadii xaalad degdegi ay jirto.**

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2023 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**